



Madaxtooyada Dawladda Puntland WAR-SAXAAFEED

TIX/004B/2017

Oct 5, 2017

Shirkii Golaha Xukuumadda Dawladda Puntland oo ku qabsoomay Caasimada Ganacsigga Puntland ee Boosaaso oo uu shir-guddoominayay Madaxweynaha Dawladda Puntland Dr. Cabdiweli Maxamed Cali Gaas ayaa waxaa looga hadlay arrimaha kala ah Amniga Puntland, Xoojinta Arrimaha Mashaarlicda Horumarinta, Shirka Kismaayo, Qaabka Wadda-shaqeynta Wasaaradaha Puntland iyo kuwa Federaalka, Arrimaha Siyaasadda dalka iyo Ansixinta Xeer Hoosaadka Golaha Wasiiradda.

Amniga:

Golaha Xukuumadda Puntland ayaa sheegay in amniga dalku wacan yahay guud ahaan, isla markaana ciidamadu ay si joogto ah ugu hawlan yihiin ka horfaga dhagarta cadowga Puntland gaar ahaan Al-shabaab iyo Daacish iyo xalinta isku dhacyada Beelaha ka dhasha.

Dawladda Puntland waxay ku boorinaysaa shacabka Puntland in ay amnigooda ilaashadaan una soo gudbiyaan laamaha amniga cidkasta oo ay ka shakiyaan ama ay ku tuhmaan inuu ka mid yahay Al-shabaab.

Xoojinta Arrimaha Mashaarlicda Horumarinta.

Golaha Xukuumaddu waxay caddeeyeen in ay tahay Mudnaanta koowaad xoojinta mashaarlicda horumarineed ee Dalka ka socda si ay uga baxaan shacabka Puntland go'doonka ka haysta tayo xumada Kaaba-yaasha dhaqaalaha, isla markaana ay ula tartamaan Aduunka gaar ahaan Garoomada, Waddooyinka iyo Dekadaha kuwaas oo ay shacab Puntland baahi weyn u qabaan.

Sidoo kale waxay golluhu u sheegeen shacabka in Puntland ay ku socoto waddo ay iskaga filaan-doonto dhinacyada kaabe-yaasha dhaqaalaha oo ay ugu weyn tahay dhismaha iyo casri-yenta Dekada weyn ee Boosaaso loona baahan yahay in si wada-jir ah loo ilaashado.

Shirka Kismaayo.